



Federal Republic of Somalia  
House of the People  
Office of the Speaker

Ref: 1450 /10/1/9/16:الرقم

Mogadishu, 10/11/2016 التاريخ

- Ku: Jaamac Maxamed Qaalib -Muqdisho  
Ku: Xusein Ceelaabe Faahiye -Muqdisho  
Ku: Axmed Saciid Farax -Muqdisho  
Ku: Maxamuud Axmed Ismaaciil -Muqdisho  
Ku: Ciise Ducaale Buun -Muqdisho  
Ku: Ibraahiim Axmed Caabi -Muqdisho  
Ku: Cabdirizaaq Daahir Xusein -Muqdisho  
Ku: Guddoomiyaha Guddiga Doorashada Dadban ee heer Federaalka -Muqdisho.  
Ku: Guddoomiyaha Guddiga Doorashada Dadban ee Heer Dowlad-Gobaleed ee u gaara ah Somaliland - Muqdisho.  
Og: Guddomiyaha Guddiga Xalinta Khilaadka Doorshooyinka -Muqdisho.  
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya -Muqdisho.  
Og: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya -Muqdisho.  
Og: R/Wasaaraha kuXiggeenka Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, -Muqdisho.  
Og: Xoghayaha Guud Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya -Muqdisho-  
Og: Dhammaan Odayaal Dhaqameedka Gobollada Woqooyiga Soomaaliya ee Soomaaliland - Gacansaar -Muqdisho

**Ujeedo:** Magacaabid Xubnaha Guddiga fulinta doorashooyinka dadban ee 2016 oo u gaar ah.

Mudaneyaal,

Waxaan idinku wargelinaya in wadatashi qottodheer ka dib lagu gartay laguuna magacaabay inaad xubin ka noqoto Guddiga fulinta doorashooyinka dadban ee 2016 oo u gaarka ah doorashada xubnaha Aqalka Sare ku yeelanayaan Gobollada Woqooyiga Soomaaliya ee Soomaaliland oo aan weli qoondo ka helin kuraasta Aqalka Sare e Baarlamaanka Federaalka.

Tell: +252 612224442/ +252 615577472

E-mail: [speaker@parliament.gov.so](mailto:speaker@parliament.gov.so)

Website: [www.parliament.gov.so](http://www.parliament.gov.so)



Guddoomiyeyaasha Guddiyada Doorashooyinka dadban ee 2016 ee Heer Federaal iyo Heer Goboleedba waxaa laga codsanaya in midba xilka kaga beegan ay la hawlgalaan Guddiga Fulinta doorashada Xubnaha Aqalka Saree e Baarlamaanka JFS, Odeyaal-dhaqameedkana degdeg u hawlgelisaan.

Si aad ula socotaan waxaan halkaan idinku soo lifaaqay Hannaanka Doorashada dadban ee u gaarka ah Gobollada ujeeddada ku xusun oo is-fasiraya iyadoo diyaar leydinla yahay hadba wixii faahfaahin dheeraad ah ee aad nooga baahataan.

Ugu danbeyn waxaan mudaneyaal mahad gaar ah idin soo tebinaynaa oggolaanshaha aad naga ogolaateen fulinta iyo maareynta xilqaankan Qaran oo ummada u leh ahmiyad gaar ah, waxaanna Allahu swt idinka baryeyna in xilkan culus uu idin fududeeyo idinkuna garabgalo.

Naga guddooma salaan diiran iyo qaddarin gaar ah.

M. ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"  
Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS

